Ku dhaqan Xafiis D.


# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

# OFFICIAL BULLETIN

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 4aad** **FAAFIN SANADLE** **Muqdisho** **2016**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**


**Uruurinta Sharciyada iyo Wareegtooyinta ee Jan-December 2016**

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.

Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

W.M

## BOGGA LABAAD

XEER

## BOGGA SEDDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

## SANADKA

# 2016

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Golaha Shacabka

# QARAAR GOLAHA SHACABKA
# KU SAABSAN

# DOORASHADA MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Muqdisho 10, Seteembar 2012

**BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**Markuu arkay:** Hadal qoraalka Kalfadhigiisa 1aad fadhigiisa 9aad ee 10/09/2012 lagu doortay Madaxweynaha Federalka Soomaaliya

**Markuu arkay:** Natiijada codeynta Baarlamaanka ku saabsan Doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya kuna xusan hadal qoraalka Golaha Kalfadhiga 1aad Fadhigiisa 9aad ee 10/09/2012 waxayna doorashada u dhacday sida halkan hoose ku xusan.

1. Xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa isu soo sharaxay (25) Labaatan iyo Shan Musharax, oo sida Guddiga Doorashada caddeeyay, soo buuxiyey shuruudaha qofka loo dooran karo xilka Madaxweynaha oo ku xusan Qodobka 88aad ee Dastuurka.
2. Inta aan la gudagelin codeynta waxaa musharaxnimda ka tanaasulay sadax musharax oo kala ah:

    1. *M.ne Cabdiraxmaan Cabdishakuur Warsame*
    2. *M.ne Bashiir Nuur Bidaar*
    3. *M.ne Xuseen Khaliif Jaamac*

3. Wareegga 1aad ee Doorashda Madaxweynaha Jumhuuriyada Federaalka Soomaaliya oo ay goobjoog ahaayeen (274) Laba Boqol Todobaatan iyo Afar oo codeeyey, waxaa ku tartamay (22) Laba iyo Labaatan Musharax oo codadka u kala helay sidan;

    1. *M.ne Shariif Sheikh Axmed (64) Lixdan iyo Afar Cod*
    2. *M.ne Xasan Sheikh Maxamuud (60) Lixdan Cod*
    3. *M.ne Cabdiwali Maxamed Cali Gaas (30) Soddon Cod*
    4. *M.ne Cabdiqaadir Cosoble Cali (27) Labatan iyo Todobo Cod*
    5. *M.ne Cabdullahi Axmed Caddow (24) Labatan iyo Afar Cod*
    6. *M.ne Cabdiraxman Macalin Cabdullahi Badiyow (22) Labaatan iyo Labo Cod*

7. *M.ne Maxamed Cabdullahi Maxamed Farmajo (14) Afar iyo Toban Cod*
8. *M.ne Yuusuf Garaad Cumar (8) Sideed Cod*
9. *M.ne Axmed Ismaacil Samatar (8) Sideed Cod*
10. *M.ne Maxamed Cabdiwali Sheekh Axmed (6) Lix cod*
11. *M.ne Cabdiwaaxid Cilmi Goonjeex (3) Saddex cod*
12. *M.ne Cumar Salaad Cilmi (2) Labo Cod*
13. *M.ne Xaaji Maxamed Yaasiin (2) Labo Cod*
14. *M.ne Saciid Ciise Maxamuud (1) Hal Cod*
15. *M.ne Cusmaan Maxamed Gacal (1) Hal Cod*
16. *M.ne Maxamed Cabdullahi Oomaar (1) Hal Cod*
17. *M.ne Sakariye Maxamed Xaaji (1) Hal Cod*
18. *M.ne Maxamed Axmed Saalax (0) Waxba*
19. *M.ne Salad Cali Jeele (0) Waxba*
20. *M.ne Cabdiraxman Maxamed Cabdi Xaashi (0) waxba*
21. *M.ne Maslax Maxamed Siyaad Barre (0) waxba*
22. *M.ne Ibraahim Cali Xuseen (0) waxba*

4. Sida uu qabo Qodobka 89-aad Faqradiisa 5(c) ee Dastuurka waxay tahay in afarta Musharrax ee ugu cod badan ku tartamaan wareegga labaad; Haseyeeshee inta aan la gudagelin wareegga 2aad waxaa tanaasulay labada musharax ku kala xusan Lr 3 iyo 4 kuwaasoo kala ah:

   1. *M.ne Cabdiwali Maxamed Cali Gaas iyo*
   2. *M.ne Cabduqaadir Cosoble Cali*

5. Saa daraadeed, wareegga labaad waxaa ku tartamay labada Musharax ee isugu soo haray waxay codadka saxda ah oo ay kala heleena waa sidan:

1. *M.ne Xasan Sheikh Maxamuud* — *(190) Boqol iyo Sagashan cod*
2. *M.ne Shariif Sheikh Axmed* — *(79) Todobaatan iyo Sagaal Cod*

6. Saa daraadeed xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa loo doortay **M.ne Xasan Sheikh Maxamuud** oo helay aqlabiyadda 2/3 cod iyo ka badan.

**Qaraar**

**Golaha Baarlamaanka Federaalka Soomaaliyeed**

**Qodobka 1aad**

Kalfadhigiisa 1aad Fadhigiisa 9aad ee 10/09/2012 oo ay goobjoog ahaayeen (274) Laba Boqol Todobaatan iyo Afar Xildhibaan uuna shir gudooominaayey Guddoomiyaha Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya **M.ne Muxammad Sh. Cusmaan Jawaari** oo ay kaalinayeen ku-xigeenka 1aad iyo ku-xigeenka 2aad ee Baarlamaanka wuxuu guddoonsaday in:

**Xildhibaan Xasan Sheikh Maxamuud**

Ku guuleystay in uu noqdo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed laga bilaabo 10^ka^ Sebteembar 2012 xilkana Golaha Baarlamaanka Federaalka hortiisa loogu dhaariyey isla maalintaas.

**Qodobka 2aad:**

Waxaa la cadeenayaa in kursiga Xildhibaanimada M.ne Xasan Sheikh Maxamuud uu banaan yahay laga bilaabo 10^ka^ Sebteembar 2012 laguna soo buuxin doono isla habraaca xildhibaankii hore lagu soo xulay.

**Qodobka 3aad**

Qaraarkani wuxuu dhaqangelayaa 10^ka^ Sebteembar 2012

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka